

# COVID-19 Rent Relief Grants

## Questions and answers

Information in Somali

### Waa maxay deeqda kaalmada kirada?

Dowladda Fiktooriya waxay aasaastay \$ 80 milyan oo deeq caawimaad ah looguna talagalay dadka guryahooda kireeya.

Deeqdan dhaqaale waxaa heli kara dadka reer Fiktooriya ee dakhligoodii ku waayay cudurka faafa ee coronavirus (COVID-19).

Dadka reer Fiktooriya ee dhib ka kala kulmay inee iska bixiyaan kirada ayaa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan deeq ah illaa \$3,000.

### Yaa u qalma deeqda gargaarka ijaarka?

Si aad ugu qalanto deeqda waxaa lagaaga baahan yahay:

- Inaad ogolaatid dhimista ijaarka oo aad kala heshiisay qofka guriga kaa kireystay aadna iska diiwaangeliso heshiiska kirada cusub ee Consumer Affairs Victoria. Haddii aadan awoodin inaad heshiis la gasho qofka guriga kaa kireystay waxaad caawimaad ka raadin kartaa Consumer Affairs Victoria
- Dakhligaagu waa inuu ka yaraada \$ 1,903 isbuucii
- Iyo waa inaad haysataa wax ka yar \$ 10,000 oo kayd ah.

Ma jiraan wax looga baahan yahay inaad tahay muwaadin ama aad leedahay deganaansho si aad u xareysato codsigaaga.

### Sideen u codsadaa deeqda?

Haddii aad ka diiwaangelisay heshiiskaaga kirada cusub Consumer Affairs Victoria, waxaad ka dalban kartaa Deeqda Rent Relief onlayn adiga oo maraya <<https://rentrelief.covid19.dhhs.vic.gov.au/>>.

### Maxaa deeqda loo isticmaali karaa?

Haddii deeqdaada la oggolaado lacagta ayaa si toos ah loogu diri doonaa milkiilaha gurigaaga iyadoo laga dhigayo inee qeyb ka tahay heshiiska kiradaada cusub.

### Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeri ah?

Macluumaadka ugu dambeeyay ee ku saabsan Deeqaha Relief Aid-ka COVID-19, booqo <<https://www.housing.vic.gov.au/help-renting/rentrelief>>

Si aad u diiwaangeliso heshiiskaaga cusub ee kirada ama aad caawimaad uga doonato Consumer Affairs Victoria, booqo

<<https://www.consumer.vic.gov.au/resources-and-tools/advice-in-a-disaster/coronavirus-covid19-and-your-rights-renting-rules-and-support-during-the-moratorium>>

Hadaad ubaahantahay caawinaad turjubaan mid kamid ah macluumaadka kor kuqoran ka wac Adeegga Tarjumida iyo fasirada (TIS National) 131 450.

Waxaa idman oona daabacday Dowlada Fiktooriya, 1 Treasury Place, Melbourne.

© Gobolka Victoria, Australia, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha, sabteembar 2020.